

Waxaa la gaaray xiligii ciyaaraha barafka caruuta 2020, waa tartan ilmaha dhan ay reynayaan oo lagu abaal marinayo bilad dahab ah oo fiican marka ay dhamystaan ciyaarta.

Sabtida 7 mars ilmaha ilaa 10ka sano jira way imaan karaan ciyaaraha barafka Lugnet ee Falun. Uma baahnid inaad horey isku sii diiwaan galiso kaliya hadafku waa in aad ka qayb qaadato.

Qaabka garoonka:

Caruurta waxay kala dooran karaan in ay ku socdaan wadada 200 mitir, 600 mitir, iyo 1500 mitir. Dabcan waadna dooran kartaa inaad dhowr wareeg samayso hadii aad rabto.

Waqtiga iyo qarashka:

saacada 9:30 waxaa furmaya daaqada tikidka, halkaas oo aad ka gadan kartaa numberada oo ayagu ka dhigan cadaynta ka qaybqaadashada. Bilawga kowaad waa 10:00, caruurta ugu dambaysana waxay gali doonaan 13:00. Qarashka wa 30kr /cunigii waxaa qiimahaas ku jira bilada ciyaarta barafka. Kaash iyo swish aya la aqbalayaa oo kaliya.

Amaahsashada qalabka barafka:

waxaa jira qalabka ciyaaraha barafka oo xadidan oo ay amaahsan karaan ilmaha aan haysan alaabta ciyaarta sidaha kabaha iyo ulasha barafka. Numberada kabaha yaala waa 26-44. Qof wayn ayaa u qaadi kara ilmaha qalabka la amaahsanayo waa inuu qofkaasna ID kaar wato ugu badnaan hal saac ayaana la amaahsan karaa islama meeshii laga qaaday ayaana lagu soo celinayaa si ilmaha dhan ay fursad u helaan.

Cunto la gadan karo:

garoonka gudihisa waxa laga helaa hambergar iyo kooraf kulul, soyakooraf, kafee, shaah, Festis, cabitaan Loka iyo shukulaado buskud. Dabka wax lagu shiilo asagana waa laga helaya hadii aad cunto horey usoo qaadato.

Soo wado reerkaaga iyo asxaabtaada oo hakula imaadeen Lugnet si ay noola dareemaan farxada ciyaaraha barafka.

Waxaa mahad balaan iska leh Falun Kommun, Falu Energi & Vatten, Grådö Mejeri, Norlandia och Kopparstaden oo noo fududeeyay inaa qabanqaabino howshan caruurta iyo familka ku saabsan.

Waxaa idin salaamaya howlwadeeno ka socda Dalarnas Skidförbund, Friluftsförbundet, Korsnäs IF Skidor & Holmens IF

gacmo furan kusoo dhawaada!